# Global Storybooks

globalstorybooks.net

## Kalaay waxay la hadashaa dhirta

Ursula Nafula
Jesse Pietersen
Abdi Muse

This work is licensed under a Creative Commons Attribution 4.0 International License.
https://creativecommons.org/licenses/by/4.0

# Kalaay waxay la hadashaa dhirta



Ursula Nafula
Jesse Pietersen
Abdi Muse

2

Soomaali so



Tani waa Kalaay. Waxay jirtaa toddoba sano. Magaceeda macnihiisa waa “midda wanaagsan” luqaddeeda, Lubukusu.



Kalaay way soo toostaa waxeyna lahadashaa geedka liinta ah. “Fadlan geedka liinta ahoow, weynoow oo na sii liin badan oo bissil.”



Kalaay waxay aadaa dugsiga. Jidka waxay kula hadashaa cawska. “Fadlan caws, weynoow cagaaro oo ha qallalin.”





“Liinta weli waa cagaar,” ayay ku neef tuurtay Kalaay “Waxaan ku arki doonaa berrito geedka liintaw,” ayay tidhi Khalaay. “Malaha markaas baad ii yeelan doonto midho liin ah oo bislaaday!”



Markay Kalaay guriga ku laabato, waxay booqataa geedka liinta." Miyay bislaadeen midhahaada wali?" Ayey weydisaa Khalaay.





Kalaay waxay soo martaa ubaxyo duureed. "Fadlan ubaxyo, sii magoola, si aan timaheyga idiin saarto."



Iskuulka, Kalaay waxay la hadashaa geedka dhexda xerada ku yaallo. “Fadlan geed, so saar laamo waaweyn si aan ugu akhrisano hooskaada.”





Kalaay waxay la hadashaa bowdka ku wareegsan dugsigeeda. “Fadlan u kora si awoodleh oo joojiya soogallida dadka xun.”